FROM PRIMARY TO HIGH SCHOOL: THE NEXT BIG STEP
HOW PARENTS CAN HELP
INFORMATION SHEET 2

Dugsi hoose dhexe ilaa Dugsi sare: Tallaabada ku xigta ee weyn

Siddey waalidiintu ku caawin karaan

Bilaabida dugsiga sare waxay ku noqoneysaa khibrad cusub ilmahaaga. Dugsiga waxaa laga yaabaa inuu leeyahay ardey aad u badan ilmahaaguna wuxuu lahaan doonaa macalimiin dhawr ah oo kala duwan, fasalo kala duwan wuxuuna u baahan doonaa inuu qoraalo iyo buuggaag sido markuu fasal ka baxo ee uu mid kale galaba.

Ka hor intaanun ilmahaagu bilaabin dugsiga sare, kala hadal xaaladaha kala duwan iyo dadka laga yaabo inuu kula kulmo dugsiga korna u qaad fursada uu ka sameysan karo saaxiibo cusub.

Caawimaada qoyska iyo shaqaalaha dugsiga, ardeydu badanaa si dhakhsa ah ayey ula qabsadaan xaaladoodan cusub.

Fadlan ogsoonow:
Waa muhiim inaad u sheegto Maamulahaaga ka hor intaanun dugsigu bilaaban haddii uu leeyahay ilmahaagu wax xasaasiyad ah ama xaalad caafimaad. Tan waxaa lagu tilmaami karaa foomka isdiiwaangelinta dugsida meesha kuu bannaan ee loogu talagalay.

Waa inaad sidoo kale u ogolaataa inuu dugsigu ogaado isla markiiba haddii aad ka warqabto xasaasiyad cusub ama xaalado caafimaad.

Macalimiin cusub

Dugsiga sare, waxaa laga yaabaa inay ardeydu leeyihiin sided ama macalimiin ka badan, iyo marka lagu daro La talliyaha Ardeyda si ay u siiyaan caawimaad iyo taageero. Waa wax caadi ah ardeyda cusub ee Year 7 inay dareen tan ka muujiyaan

Waa muhiim inaad ogeysiiso si ay u ogaadaan inay jirtaan dad caawinaya waana inaysan ka hakan su'aalo weydiinta.

Jadwalka

Maadooyinka dugsiga sare badanaa waxaa la dhigaa casharka 40 ilaa 60 daqiiqo, oo layiraahdo 'periods'. Maado kastaa waxaa la dhigayaa hal ama laba periods wakhtigiiba. Si aad ula socoto dhammaan casharada kale oodhan iyo fasalada, ilmahaaga waxaa la siinayaa jadwal muujinaya madooyinkooda, wakhtiyada period iyo maalaha fasaladu ku yaaliin.

Waa fikrad wanaagsan inaad ka caawiso ilmahaagu inuu jeegareeyo jadwalkiisa markay guriga yimaadaan fiid kasta si ay u hubiyaan inay ku ritaan wax kasta oo ay ugu baahan yihiin maalinta ku xigta – sida buuggta, qalabka waxqorista, PE (cayaaraha) qalabka cayaaraha iyo labiskiisa

Saaxiibada cusub

Sameysadka saaxiibo cusub waa lacala hawlaha ugu muhiimsan ee ilmahaagu la kulmi doono markay bilaabaan Year 7 . ku dhiirigeli ilmahaaga inuu ka qaybgalo nashaadka si ay u bartaan dadka kale oo ay u qaataan wakhti wanaagsan.

Ku lugyeelashada waalidka

Dugsiyadeena sare waxay soo dhaweynayaan ku lugyeelashada waalidka iyo wax ka geysigaba.

NEW SOUTH WALES
DEPARTMENT
OF EDUCATION
AND TRAINING

Kooxaha waalidiinta sida (jamciyada muwaadiniinta iyo waalidiinta) waxay bixiyaan fursad ay ku noqdaan kuwa ku lugyeesha nolosha dugsiga oo ka qaybgala go'aan gaarida. Iskaa ugu shaqeynata dhacdooyinka dugsiga iyo fasalka dhexdiisa waxay noqon kartaa si weyn oo aad kula kulmi karto waalidiinta kale iyo shaqaalaha dugsiga. Waan ka mahadcelineynaa caawimaad kasta oo aad bixin karto.

Caawinta ardeyda leh baahida khaaska ah

Waalid ahaan ama xannaaneeye ilmaha leh iinta waxbarasho ama dhibka waxbarasho, waxaa ku caawin doono dad fara badan oo kula shaqeyn doona si aad ugu sameyso doorashadii saxda ahayd ilmahaaga.

Doorashooyinka uu heli karo dugsiga sare waxaa ka mid ah:

- Fasalada joogtada ah ee dugsiyada joogtada ah
- Fasal ku caawinta dugsiyada joogtada ah
- Dugsiyo leh adeegyo taageero oo khaas ah

Ka hor intaadan diiwaangelin ilmahaaga, waxaa lagu weydiin doonaa inaad la xirriirto xafiiska gobolka ee xaafadaada si shaqaalahayagu ay u qiimeeyaan fursadahaaga oo ay kaaga caawiyaan inaad doorato dugsiga saxda ah ilmahaaga.

Dharka dugsiga iyo lebiska

Inuu ilmahaagu u soo lebisto dharka dugsiga ee saxda ah maalinta 1 waxay siineysaa iyaga dareen lahaansho oo ah dugsigiisa cusub. Dugsiyada badanaa waxay ku shaqeeyaan school clothing pool (dharka dugsiga oo iib ku ah dugsiga), ama dugsiga ayaa kugula talinaya dukaanka aad ka soo gadan karto dharka dugsiga.

Aqoonsiga safarka gaadiidka

Foomamka codsiga ee tareenka, baska iyo/feeriga lagu raaco waxaa laga heli doonaa dugsiga sare ee ilmahaaga Xilliga 4. foomamkan badanaa boosta laguu laguu soo dhigayaa iyagoo uu la socdo foomka isdiiwaangelinta. Waa in lagu soo celiyaa dugsiga sare intuusan dhammaan sannad dugsiyeedku si loo hubiyo in dhammaan kaadhadhka safarku inay diyaar yihiin bilowga sannad dugsiyeedka ku xiga.

Wasaaradda Gaaddiidka ayaa maamusha Qorshaha Gaaddiidka Ardeyda Dugsiga. Haddii aad qabto wax weydiimo ah fadlan wac Wasaaradda Gaaddiidka on 1800 227 774 ama (02) 9891 8900

Kharashaadka waxbarashada iyo lacag ka bixinta dugsiga

Dugsiyada sare ee dawladu waxay leeyihiin laba nooc oo kharashaad ah. Lacag bixin iskaa ah oo guud oo la codsanayo si ay uga caawiso dugsiga inuu keeno fursado ilmo macluumaad iyo barasho u leh ardeyda.

Waxaa sidoo kale jira ujro maadooyinku leeyihiin, oo loo codsado maadooyin khaas ah sida tignoolajiyada cuntada iyo farshaxanka muuqaalka ah. Ujrada maadooyinka waxay caawinayaan si loogu soo iibiyo alaabta uu u isticmaalo ardeygaagu mid kasta oo ka mid koorsooyinkan.

Haddii ay ku heysato dhibaato lacag la'aaneed, fadlan la hadal Maamulahaaga. Caawimaada kharashka ujrada maadada, sidoo kale kharashaad kale sida dharka dugsiga, dalxiiska gaaban habeeno dhaxa dugsiga ayaa laga yaabaa inay jiraan.

Taleefananada gacanta (mobile)

Isticmaalka taleefanada gacanta iyo qalabyada kale ee layskula xirriiro ee elektaroonikada ah waa si xoogan ayaa laysaga digayaa saaxadaha dugsiga lagu jiro dugsiyadeena taleefanadana lama isticmaali karo wakhtiyada casharada lagu jiro.

Waalidiinta waxaa loo sheegayaa inay iska ilaaliyaan soo wicitaanka ama u soo dirida dhambaalada SMS carruurtooda wakhtiga dugsiga lagu jiro meel alaale meeshii suurto gal ah. Haddii ay lagama maarmaan tahay, dhambaalada waxaa loo soo gudbin karaa ardeyda iyadoo loo soo marinayo xafiiska dugsiga.

Adeega turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya si aad ula xirriirto maamulahaaga, fadlan wac Adeega Turjubaanka Taleefanka taleefankan ah 131 450 kuna weydiiso turjubaan afkaaka ah. Turjubaanka ayaa wacaya maamulaha oo khadkana ku jiraya si uu kaaga caawiyo hadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaa qaadi mayo.

© May 2006
NSW Department of Education and Training

GPO Box 33
Sydney NSW 2001
T 9561 8000
www.det.nsw.edu.au
NSW Public Schools - Leading the way
Dugsiyada sare ee NSW – oo hogaamiyana

NEW SOUTH WALES
DEPARTMENT
OF EDUCATION
AND TRAINING

Ogow wax dheeraad ah

Wixii macmuulaad dheeraad ah la hadal maamulaha dugsigaaga, la xirriir xafiiska gobolkaaga ama gal www.schools.nsw.edu.au

Wixii macluumaad turjuman ah gal www.det.nsw.edu.au/languagesupport